Dowladda Federaalka Soomaaliya
**Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha**

# WARBIXINTA WARSHADAHA SOOMAALIYA 2026

**Diiwaangelinta Warshadaha (2009–2026), Sumadaha Ganacsiga iyo Hantida Maskaxeed (2020–2026), iyo Waxqabadka Waaxda (2025–2026)**



**268**
**Warshado**

**+5,260%**
**Koboc 2009–2026**

**2,520**
**Sumado la diiwaangeliyey**

Xogta la soo ururiyey ilaa Agoosto 2026

# HORDHACA WARBIXINTA

**Warshadayntu waa tiir ka mid ah madaxbannaanida dhaqaale iyo koboca Soomaaliya. Warbixintani waxay soo bandhigaysaa koboca warshadaha, diiwaangelinta sumadaha iyo waxqabadka waaxda.**

Fariinta Wasiirka 01

5 ilaa 268 warshadood 02

Warshadayn iyo suuqyo 03

268 warshadood 04

Warbixinta 2026 05

Koboc la cabbiri karo 06

Mudnaanta: tayo iyo tartan 07

Tallaabada xigta 08

Gunaanad 09

"Mudnaanteennu maaha inaan tiro kordhinno, ee waa inaan tayo dhisno." 10

# TUSMADA IYO HABKA WARBIXINTA

| | | |
|---|---|---|
| 01 | **Gudmar fulineed** | Natiijooyinka muhiimka ah |
| 02 | **Diiwaangelinta Warshadaha 2009–2026** | Xog, kobac iyo marxalado |
| 03 | **Sumadaha Ganacsiga iyo Hantida Maskaxeed 2020–2026** | Adeegga SIPO |
| 04 | **Waxqabadka Waaxda 2025–2026** | Sharci, kormeer iyo iskaashi |
| 05 | **Caqabadaha, Talooyinka iyo Mudnaanta 2026–2027** | Jihaynta hore |
| A | **A Lifaaq — Diiwaanka Waxqabadka** | 30 dhacdo oo la diiwaangeliyay |

## HABKA LA ISTICMAALAY

Warbixintan waxaa lagu dhisay laba il oo rasmi ah. Xogta tirakoobka ee Qaybta 02 iyo 03 waxay ka timid diiwaangelinta warshadaha ee Wasaaradda iyo diiwaanka Xafiiska Hantida Maskaxeed ee Soomaaliya (SIPO). Diiwaanka waxqabadka ee Qaybta 04 iyo Lifaaqa A waxaa laga soo ururiyay warfaafinta rasmiga ah ee Wasaaradda muddada 20 Maajo 2025 ilaa 29 Agoosto 2026, iyadoo la soo saaray oo keliya dhacdooyinka toos ugu xiran Waaxda Horumarinta Warshadaha ama howlaha warshadaynta.

### OGEYSIIS XOG

**Xogta sannadka 2026 waa xog qayb ah — waxay daboolaysaa ilaa bisha Agoosto 2026. Tirooyinka sannadka oo dhan waxaa la buuxin doonaa warbixinta xilliga xiritaanka sannadka.**

# GUUDMAR FULINEED

Muddada 2009 ilaa 2026, tirada warshadaha ka diiwaangashan Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha waxay ka kortay 5 warshadood ilaa 268 warshadood, oo ah koror dhan 5,260%, waana sawirka ugu cad ee muujinaya sida warshadaynta dalku uga soo kabatay burburkii dhaqaale ee soo maray Soomaaliya. Waaxda Horumarinta Warshadaha ayaa xilliyadaas oo dhan ahayd hay'adda diiwaanka haysa, kormeerta, sharciyaysa, taageertana horumarka qaybtan.

Dhinaca kale, adeegga hantida maskaxeed ee Xafiiska Hantida Aqooneed ee Soomaaliya (SIPO), oo hoos yimaada Waaxda, wuxuu muddo lix sannadood ah diiwaangeliyay 2,520 sumadood ganacsi oo ka mid ah 4,500 codsi. Dhammaan 8-da kiis diidmo ee soo gudbay waa la xalliyay, waxaana la daabacay 24 Joornaal Hanti Aqooneed.

Sannadka 2026 wuxuu sidoo kale keenay guul sharci oo weyn: ansixinta Golaha Wasiirrada ee Sharciga Caddeynta Asalka Badeecadaha Soomaaliya, 6 Agoosto 2026.

## TIROOYINKA MUHIIMKA AH — WARSHADAHA

**268**
Warshado Diiwangashan

**+41**
Warshado Cusub

**17**
Sano Kobac Joogto

**+5,260%**
Koboc 2009–2026

## TIROOYINKA MUHIIMKA AH — HANTIDA MASKAXEED

**2,520**
Sumadaha Diiwangashan

**4,500**
Codsiyada Guud

**8/8**
Kisaska la Xaliyay

**24**
Joornaal Hanti Aqooneed

# SHAN ARRIN OO WARBIXINTANI CADDAYNAYSO

- **Sharci la ansixiyay —**

**Sharciga Caddeynta Asalka Badeecadaha:** Wuxuu Golaha Wasiirrada ka soo gudbay 6 Agoosto 2026 — 14 bilood kaddib markii Waaxdu furtay tababarkii ugu horreeyay ee mawduucaas. Waa wareeg siyaasadeed oo dhamaystiran.

- **Dardargelin cusub —**

**Kobaca warshaduhu ma aha mid siman**: 2023–2026 waxaa soo kordhay 91 warshadood oo cusub, taasoo ah in ka badan saddex-meelood meel wadarta 17 sano ee la soo dhaafay.

- **Adeeg xasilloon —**

**Diiwaangelintu waxay noqotay adeeg la isku halayn karo:** celcelis ahaan ~420 sumad ganacsi ayaa la diiwaangeliyay sannadki, iyadoo 100% kiisaska diidmadu ay xal waara heleen.

- **Sharci soo socda —**

**Qabyo-qoraalka Siyaasadda iyo Sharciga Hanti-Maskaxeedka Qaranka:** wuxuu gaaray heerka ansixinta kama-dambaysta ah bishii Agoosto 2026, kaddib wadatashiyo ballaaran — balse wuxuu weli sugayaa ansixin siyaasadeed iyo in loo gudbiyo goalaha Wasiirrada.

- **Caqabadaha hadhay —**

Aagagga warshadaha, tamarta qaaliga ah, iyo tayada baakadaynta ayaa weli ah caqabadaha ugu waaweyn ee xannibaya in kororka tirada warshaduhu u beddelmo wax-soo-saar tartan leh oo la dhoofin kara.

> **“Inkastoo Soomaaliya ay horumar ka samaysay siyaasadda ganacsiga iyo helitaanka suuqyo waaweyn, haddana horumarkaas mar walba uma uusan beddelmin ganacsiyo xooggan, dhoofin qiimo sare leh iyo maalgashi cusub. Horumarinta Warshadaha  waa habka aan ku soo afjareyno farqigaas.”**
>
> AGAASIMAHA GUUD EE WASAARADDA,
> MUDANE IBRAHIM AHMED OSMAN · MUQDISHO, 12 AGOOSTO 2026

## WAXA WARBIXINTU AY SOO GUDBINEYSO

Diiwaangelintu waa marxaladda koowaad. Tallaabada xigta ee Waaxdu waa in 268-ka warshadood loo beddelo saldhig xog oo faahfaahsan — nooca wax-soo-saarka, awoodda, shaqaalaha iyo goobta — si siyaasadda maalgashiga, aagagga warshadaha iyo dhoofintu ay ku dhisanto xaqiiqo la cabbiri karo.




# Diiwaangelinta Warshadaha 2009 - 2026

Xogta sannadba sannadka ka dambeeya, marxaladaha kobaca,
iyo saamaynta dhaqaale ee warshadaha diiwaangashan.

Diiwaanka warshaduhu waa isha kaliya ee rasmiga ah ee sheegaysa inta warshadood ee dalka ka shaqaynaysa. Toddoba iyo toban sano gudahood waxey ka bateen shan diiwangashan ilaa 268 warshadood ee la diiwaangeliyay — waana muuqaalka ugu cad ee lagu qiyaasi karo halka warshadaynta ay Soomaaliya marayso.

**268**
**Warshado Diiwangashan**

**+41**
**Warshado Cusub**

**91**
**Warshado Cusub**


**+6,500**
**Shaqo la Abuuray**

# XOGTA DIIWAANGELINTA SANNADBA SANNADKA KA DAMBEEYAY

Jadwalka hoose wuxuu muujinayaa tirada warshadaha la diiwaangeliyey sannad kasta intii u dhaxaysay 2009 ilaa 2026, so loo tilmaamo heerarka iyo jihada koboca horumarinta warshadaha Soomaaliya.


| SANNADKA | WARSHADAHA LA DIIWAANGELIYAY | ISBEDDELKA SANNADKII HORE |
|---|---|---|
| **2009** | **5** | Bar-bilaw/Baseline |
| **2010** | **7** | +2 |
| **2011** | **8** | +1 |
| **2012** | **10** | +2 |
| **2013** | **18** | +8 |
| **2014** | **30** | +12 |
| **2015** | **45** | +15 |
| **2016** | **60** | +15 |
| **2017** | **75** | +15 |
| **2018** | **102** | +27 |
| **2019** | **118** | +16 |
| **2020** | **130** | +12 |
| **2021** | **142** | +12 |
| **2022** | **159** | +17 |
| **2023** | **177** | +18 |
| **2024** | **189** | +12 |
| **2025** | **277** | +38 Koror sare |
| **2026** | **268** | +41. Kororka ugu badan |

# XOGTA DIIWAANGELINTA SANNADBA SANNADKA KA DAMBEEYA




## SAWIRKA 1-AAD

Kobaca warshadaha la diiwaangeliyay, 2009–2026, oo lagu qeybiyay afarta marxaladood ee horumarka. Xariiqda ayaa muujinaysa wadarta isu-gudbaysa ee warshadaha diiwaangashan sannad kasta.




## SAWIRKA 2-AAD

Warshadaha cusub ee la diiwaangeliyay sannad kasta. Sannadaha 2018, 2025 iyo 2026 (midab caanbeeg) ayaa ah kuwa ugu kobaca badan ee muddada la eegayo.

# AFARTA MARXALADOOD EE ISBEDDELKA HORUMARKA WARSHADAHA

Koboca warshadaha la diiwaangeliyey waxaa loo qaybin karaa afar marxaladood oo kala duwan, kuwaas oo mid walba ka tarjumaya xaaladaha siyaasadeed, nidaamyada maamul, iyo isbeddellada dhaqaale ee jiray xilliyadaas kala duwan.

| MARXALADDA | MUDDADA | HEERKA | ASTAANTA MARXALADDA |
|---|---|---|---|
| **HEER I - BILAABID** | 2009–2012 | 5–10 | Bilowga koboca warshadaha |
| **HEER II - BALLAARIN** | 2013–2016 | 18–60 | Kordhin maalgelinta warshadaha iyo koror warshadaha yaryar |
| **HEER III - XASILOONI & KORITAAN** | 2017–2022 | 75–159 | Koror joogto ah, horumarinta wax-soo-saarka, warshado badan oo cusub |
| **HEER IV - DARDARGELINTA WARSHADAYNTA** | 2023–2026 | 177–268 | Kobac xoogan, maalgelin ballaaran iyo balaarin warshadeed |

## FALANQEYN

Marxaladda IV (2023–2026) waxay horseeday 91 warshadood oo cusub afar sano gudahood — tiro ka badan wadarta 14-kii sano ee ka horreeyay 2018. Halkan waa halka mudnaanta siyaasaddu ay tahay in laga gudbo diiwaangelinta lana gaaro tayada wax-soo-saarka iyo awoodda dhoofinta.

# SAAMAYNTA DHAQAALE EE WARSHADAHA DIIWAANGASHAN

Diiwaangelinta warshaduhu ma aha oo keliya hawl maamul; waxay door muhiim ah ka qaadataa isbeddelka iyo koboca dhaqaalaha Soomaaliya. Warshadaha la diiwaangeliyey waxay si toos ah uga qayb qaataan horumarka dhaqaale ee dalka iyadoo ay ka mid yihiin:

- **Shaqo-abuur —**
In ka badan 6,500 shaqo oo toos ah ayay abuureen warshadaha la diiwaangeliyey muddadii u dhexeysay 2009 ilaa 2026.

- **Kororka wax-soo-saarka gudaha —**
Taas oo gacan ka geysanaysa dhimista ku-tiirsanaanta badeecadaha dibadda laga soo dejiyo, gaar ahaan qaybaha cuntada, qalabka dhismaha, baakadaha, iyo badeecadaha isticmaalka maalinlaha ah.

- **Soo jiidashada maalgashiga —**
Maadaama sharciyaynta iyo diiwaangelinta warshaduhu ay kordhiyaan kalsoonida maalgashadayaasha isla markaana fududeeyaan helitaanka maalgelin.

- **Ballaarinta saldhigga canshuuraha —**
Maadaama ay warshadaha diiwaangashan ay ka qayb qaataan kordhinta dakhliga dowladda, waxaa tillaabooyinka cusbooneysiinta lagu xeray nidaamka canshuuraha rasmiga ah ee dowladda.

- **Aasaaska sumadda “Made in Somalia” —**
maadaama warshad kasta oo la diiwaangeliyey ay qayb ka noqon karto horumarinta aqoonsiga iyo sumcadda wax-soo-saarka qaranka Soomaaliya. wax-soo-saar tartan leh oo dhoofin kara.

- **Dadaallada Lambarka Taxanaha Badeecadaha “BAR CODE” —**
Diiwaangelinta warshaduhu waxay fududaynaysaa in badeecadaha Soomaaliyeed loo sameeyo barcode rasmi ah, si loo xaqiijiyo aqoonsigooda, raadraacooda, looguna diyaariyo suuqyada gudaha iyo kuwa caalamiga ah.

## XIRIIRKA MUSTAQBALKA

Madasha Made in Somalia waxaa si rasmi ah loo daah-furi doonaa inta lagu guda jiro Bandhigga Warshadaha Soomaaliyeed (SOMIPEX 2026) ee 22–23 Sebtembar 2026 — halkaas oo diiwaanka warshadaha uu ka noqonayo saldhig suuq-geyn iyo aqoonsi qaran, ee aan ahayn oo keliya liis maamul.




# Sumadaha Ganacsiga iyo Hantida Maskaxeed 2026

Waxqabadka Xafiiska Hantida Maskaxeed ee Soomaaliya (SIPO) ee hoos yimaada Waaxda Horumarinta Warshadaha.

Sumadda ganacsi ma aha calaamad keliya — waa xuquuq sharci oo milkiilaha lagu ilaaliyo. Lix sannadood gudahood, adeeggu wuxuu ka guuray shan sumadood sannadkii ilaa boqollaal, iyadoo la dhisay nidaam la isku halayn karo oo ay ku kalsoon yihiin ganacsatada gudaha iyo shirkadaha caalamiga ah.

**2,520**
**Sumadaha Diiwangashan**

**4,500**
**Codsiyada Guud**


**8/8**
**Kisaska la Xaliyay**

**24**
**Joornaal Hanti Aqooneed**

# XOGTA DIIWAANGELINTA SANNADBA SANNADKA KA DAMBEEYA

Muddo lix sannadood ah, adeegga diiwaangelinta sumadaha ganacsigu wuxuu ka kordhay 5 sumadood sannadkii 2020 ilaa boqollaal sumadood sannadkii si joogto ah. Wadarta guud ee la diiwaangeliyay waa 2,520 sumadood.

| SANNADKA | SUMADAHA GANACSIGA LA DIIWAANGELIYAY | XAALADDA |
|---|---|---|
| 2020 | 5 | Sannadkii bilawga adeegga |
| 2021 | 133 | Ballaarinta adeegga |
| 2022 | 373 | Koror degdeg ah |
| 2023 | 673 | Heerkii ugu sarreeyay |
| 2024 | 481 | Xasilooni |
| 2025 | 564 | Koror mar kale |
| 2026 | 291 | Xog qayb ah — ilaa Agoosto 2026 |




**SAWIRKA 3-AAD**

Sumadaha ganacsiga la diiwaangeliyay sannad kasta (tiirar) iyo wadarta isu-gudbaysa (xariiq caanbeeg). Tiirka 2026 waa xog qayb

# SHAACINTA SUMADAHA LA DIIWAANGELIAYEY

Sumad kasta oo la diiwaangeliyay waxaa si rasmi ah loogu daabacaa dadweyne iyo Wargeyska Hantida Maskaxeed. Xogtu waxey muujineysaa sumadda, kala soocidda Nice Classification ee ay ku jirto, iyo in ay buuxisay shuruudaha diiwaangelinta.




**Shaacinta rasmiga ah ee 59 sumadood ganacsi oo la diiwaangeliyay, mid kasta waxaa la socda Class-yada Nice Classification ee ay khusayso. Tusmadaan waa hal nuqul oo ka mid ah shaacinta joogtada ah — ma aha wadarta 2,520 ee muddada 2020–2026.**

# WARGEYSKA HANTI MASKAXEEDKA WARSHADAHA SOOMAALIYEED

Wargeyska Hanti Maskaxeedka Warshadaha Soomaaliyeed waxaa labadi biloodba mar lagu daabacaa Waaxda. Horumarinta Warshadaha. Nuqulka 24/2026, oo la daabacay 4 Agoosto 2026, waxaa lagu shaaciyay codsiyada heer qaran iyo kuwa caalamiga ah ee la aqbalay ee la xiriira Summadaha Ganacsiga, shatiyada hal-abuurka fudud (Utility Models), shatiyada ikhtiraaca (Patents), iyo naqshadaha warshadaha (Industrial Designs).

## MUDDADA DIIDMADA

Qof kasta ama hay'ad kasta oo leh saldhig sharci oo ay ku diidi karto diiwaangelinta summadaha ganacsiga ee lagu daabacay wargeyska, waxay soo gudbin kartaa ogeysiis diidmo ah 35 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda daabacaadda.

# NIDAAMKA NICE CLASSIFICATION

Waaxdu waxay 13 Agoosto 2026 la wadaagtay dadweynaha sharraxaad ku saabsan nidaamka kala-soocidda. Lambarrada sida Class 03, Class 12, Class 25 ama Class 35.

NICE waxay tilmaamaysaa nooca badeecadaha ama adeegyada ay diiwaangelinta sumaddu khusayso. Nidaamku wuxuu ka kooban yahay 45 Class: Classyada 1–34 waxay khuseeyaan badeecadaha, halka 35–45 ay khuseeyaan adeegyada. Hal summad ayaa laga diiwaangelin karaa hal ama dhowr Class. Magaca wuxuu ka yimid magaalada Nice ee Faransiiska, halkaas oo Nice Agreement lagu ansixiyay 1957-kii.




# Waxqabadka Waaxda 2025 - 2026

Sharciyaynta, kormeerka, tayada iyo iskaashiga — diiwaanka hawlaha rasmiga ah ee Waaxda Horumarinta Warshadaha.

Muddadi 21 Maajo 2025 ilaa 29 Agoosto 2026, waxaa la diiwaangeliyay 30 dhacdo oo rasmi ah oo toos ugu xiran Waaxda ama howlaha warshadaynta. Labo ka mid ah ayaa gooni ah: ansixinta Sharciga Caddeynta Asalka Badeecadaha, iyo heshiiska shahaado-bixinta ee warshadleyda iyo SOBS.

**30**
**Dhacdo la diiwaangeliyay**

**1**
**sharci la ansixiyay**

**24**
**Joornaal la daabacay**

**14**
**Bilood: Tababar ilaa Sharci**

# SHARCIGA CADDEYNTA ASALKA BADEECADAHA SOOMAALIYA

Guusha sharci ee ugu weyn muddada aan ku eegeynto warbixintaan waa ansixinta Golaha Wasiirrada ee Sharciga Caddeynta Asalka Badeecadaha Soomaaliya, 6 Agoosto 2026. Sharcigan, oo ay soo diyaarisay Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha, wuxuu dhisayaa hannaan sharciyeed oo lagu caddeeyo laguna aqoonsado asalka badeecadaha laga soo saaro Soomaaliya.

| | |
|---|---|
| **3 Juun, 2025** | **Waaxdu waxay furtay tababarka Sharciga Asalka Badeecadaha**<br>Agaasimaha Waaxda Horumarinta Warshadaha ayaa daah-furay tababar ku saabsan Sharciga Asalka Badeecadaha iyo Qorshaha Dhaqan-Gelintiisa, oo ay ka qayb galeen hay'adaha dowladda, bulshada rayidka iyo ganacsatada gaarka ah. |
| **2 Agoosto, 2026** | **Shirka Dardargelinta NTFC**<br>Fududaynta ganacsiga waxaa lagu magacaabay tiir ka mid ah Qorshaha Isbeddelka Qaranka, iyadoo la xoojinayo is-waafajinta xeerarka ganacsiga iyo kaabayaasha hubinta tayada. |
| **3 Agoosto, 2026** | **Golaha Wasiirrada ayaa ansixiyay sharciga**<br>Golaha Wasiirrada ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ayaa ansixiyay Hindise-Sharciyeedka Caddeynta Asalka Badeecadaha Soomaaliya. Wasiirku wuxuu uga mahadceliyay Ra'iisul Wasaaraha iyo Golaha Wasiirrada, isagoo ku tilmaamay tallaabo istaraatiiji ah. |



Golaha Wasiirrada ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo ansixinaya Hindise-Sharciyeedka Caddeynta Asalka Badeecadaha Soomaaliya — 6 Agoosto 2026, Muqdisho.

IL: WARFAAFINTA RASMIGA AH EE WASAARADDA, 6 AGOOSTO 2026

## WAA MAXAY SHARCIGA ASALKA BADEECADAHA?

Sharcigani wuxuu dejinayaa hannaan sharciyeed oo qeexaya laguna caddeynayo halka ay badeecaddu asal ahaan ka soo jeeddo. Wuxuu khuseeyaa wax-soo-saarka beeraha, xoolaha, kalluumeysiga, macdanta, iyo badeecooyinka lagu farsameeyo warshadaha gudaha dalka — si loo xaqiijiyo in badeecadaha Soomaaliyeed ay yeeshaan aqoonsi rasmi ah oo waafaqsan heerarka ganacsiga caalamiga ah, isla markaana ay qaataan Shahaadada Asalka Badeecadaha (Certificate of Origin).

- **Shahaadada Asalka —**
Wuxuu fududeynayaa helitaanka Shahaadada Asalka Badeecadda, oo caddeynaysa in badeecaddu tahay mid Soomaaliyeed — waxay ka tarjumeysaa caqabad muddo dheer ku horgudbanayd ganacsatada oo la xaliyay.

- **Halbeegyo cad —**
Wuxuu dejinayaa halbeegyo iyo shuruudo cad oo lagu aqoonsanayo badeecadaha dalka laga soo saaray, kuwaas oo sare u qaadaya tayada iyo kalsoonida suuqyada.

- **Muddo ku filan ganacsatada si ay u hirgeliyaan —**
Wuxuu siinayaa ganacsiyada yaryar iyo kuwa dhexe taageero iyo muddo ku filan oo ay ugu diyaar garoobaan hirgelinta sharciga.

- **Hufnaan —**
Wuxuu xoojinayaa hufnaanta iyo isku-halleynta nidaamka bixinta Shahaadada, iyadoo Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha Soomaaliyeed ay door muhiim ah ka qaadan doonto fulinta nidaamkan.

- **Made in Somalia iyo AfCFTA —**
Wuxuu ilaalinayaa sumcadda astaanta “Made in Somalia”, isla markaana u furayaa badeecadaha Soomaaliyeed suuqyada Bariga Bulshada Afrika (EAC) Aaagga Ganacsiga Xorta ah ee Afrika (AfCFTA.)

### MUHIIMADDA WAAXDA

Muddada ay qaadatay hirgelinta sharigaan — tababar farsamo (Juun 2025), qabyo-qoraal, ansixin Golaha Wasiirrada (Agoosto 2026) waxey qaadatay 14 bilood. Tallaabada xigta waa xeer-hoosaadyada hirgelinta iyo dejinta nidaamka bixinta Shahaadada, iyadoo Rugta Ganacsigu iyo warshadaha ay qayb ka tahay.

# DIB-U-HABAYNTA SHARCIGA IYO SIYAASADDA HANTI-MASKAXEEDKA

Mudnaanta labaad ee Waaxda 2026 ku shaqaysay waxey aheyd dhisidda qaab-dhismeed sharci oo dhamaystiran oo lagu ilaaliyo hantida maskaxeed. Geeddi-socodku wuxuu maray saddex marxaladood oo cad.

| | |
|---|---|
| **15 Juun, 2026** | **Kulan wadatashi oo ay qabatay Waaxdu**<br>Wakiillo ka socday hay'adaha dowladda, dowlad-goboleedyada, ganacsiga gaarka loo leeyahay, jaamacadaha iyo khubaro ayaa ka doodday copyrights, trademarks, patents, industrial designs, geographical indications iyo aqoonta hidde-raaca. |
| **4 Agoosto, 2026** | **Daabacaadda Wargeyska 24/2026**<br>Codsiyada la aqbalay ee heer qaran iyo caalami ah oo si rasmi ah loo shaaciyay, muddo diidmo 35 maalmood ahna la furay. |
| **29-31 Agoosto, 2026** | **Kulanka ansixinta kama-dambaysta ah**<br>Dib-u-eegis iyo ansixin lagu sameeyay Qabyo-qoraalka Sharciga iyo Siyaasadda Qaranka ee Hantida Maskaxeed, xeer-hoosaadyada hirgelinta, iyo qaab-dhismeedka SIPO. |

## HALKA AY XAALADDA MAREYSO HADDA

Kulanka 29–31 Agoosto 2026 wuxuu ahaa marxaladdii ugu dambaysay ee farsamo. Tallaabada xigta waa u gudbinta Golaha Wasiirrada iyo ka dibna loogu sii gudbiyo Baarlamaanka. Ilaa taasi dhacdo, SIPO waxay ku shaqaynaysaa awood ku- meel-gaar ah — taasoo ah khatarta ugu weyn ee ku wajahan sugidda xuquuqda ganacsatada iyo hal-abuurayaasha.

# DIB-U-HABAYNTA SHARCIGA IYO SIYAASADDA HANTI-MASKAXEEDKA

10 Maajo 2026 (Axad), Xoghayaha Guud ee Hay'adda Tayo-dhawrka Soomaaliyeed ayaa shir-guddoomiyay kulan u dhexeeyay warshadleyda iyo wax-soo-saarayaasha gudaha dalka iyo Maamulka Hay'adda Tayo-dhawrka Soomaaliyeed (SOBS). Waaxda Horumarinta Warshadaha ayaa fududaysay kulankan.

Waaxda Shahaadooyinka ee Hay'adda Tayo-dhawrka ayaa warshadleyda la wadaagtay shuruudaha shahaado-bixinta badeecadaha iyo astaamaha tayada. Ugu dambayn waxaa la isku raacay in warshadleydu u hoggaansanto habraacyada shahaado-bixinta ee u degsan Hay'adda, ayna dardargeliyaan dalbashada codsiyada shahaadada badeecadaha iyo astaamaha tayada, si loo hubiyo badqabka iyo tayada wax-soo-saarka gudaha.

Agaasimaha Waaxda Horumarinta Warshadaha ayaa hoosta ka xariiqay muhiimadda ay leedahay in la kontoroolo, la baaro, lana shahaadeeyo badeecadaha gudaha dalka lagu warshadeeyo, iyo sida ay uga qaybqaadan karto kororka dhoofka iyo gaarista suuqyada caalamiga ah.




Agaasimaha Waaxda Horumarinta Warshadaha oo ka hadlaya kulanka u dhexeeyay warshadleyda Soomaaliyeed iyo Hay'adda Tayo- dhawrka Soomaaliyeed (SOBS) — 10 Maajo 2026, Muqdisho.

IL: WARFAAFINTA RASMIGA AH EE WASAARADDA, 6 AGOOSTO 2026

## SABABTA AY MUHIIM U TAHAY

Shahaadada Asalka Badeecadaha iyo shahaadada tayada waa laba shay oo isku dhow balse kala duwan: midi waxay caddaynaysaa halka ay badeecaddu ka timid, tan kalena waxey tilmaameysaa in ay ammaan iyo tayo leedahay. Suuqyada caalamigu labadaba waxey ku xiraan labadaas shahaado. Sidaas darteed, kulanka SOBS iyo Sharciga Asalka Badeecadaha waa laba dadaallo oo isku sidkan.

# DIB-U-HABAYNTA SHARCIGA IYO KORMEERKA WARSHADAHA

22 Janaayo 2026, Agaasimaha Waaxda Horumarinta Warshadaha wuxuu booqasho shaqo ku tagay warshado ka diiwaangashan Wasaaradda oo ku yaalla Muqdisho. Booqashadu waxay qayb ka ahayd qorshe ballaaran oo lagu kormeerayo warshadaha dalka, laguna fahmayo baahiyahooda, isla markaana Wasaaraddu ay uga taageerto horumarkooda iyo wax-soo-saarka gudaha.

Intii ay booqashadu socotay, Agaasimuhu wuxuu la kulmay mulkiilayaasha iyo maamulayaasha warshadaha, isagoo si toos ah u helay xog ku saabsan xaaladda wax-soo-saarka, noocyada badeecooyinka la soo saaro, iyo kaalintooda ku aaddan kobaca dhaqaalaha iyo abuurista shaqooyinka magaalada.



Khadka buuxinta biyaha ee tooska ah — kormeerka awoodda wax-soo-saarka iyo qalabka casriga ah ee warshadaha cabitaannada.



Bakhaarka wax-soo-saarka diyaarsan — eegista awoodda kaydinta iyo suuq-geynta.



Warshadda daawooyinka YeniSom — falanqaynta badeecadaha farmashiyaha ee gudaha.



Bandhigga badeecadaha YeniSom — tayada baakadaynta iyo sumadaynta.



Warshadda isbuunyada iyo joodariga — kormeerka kaydinta alaabta ceyriinka ah.

SOMIPEX

BUILD. PROCESS. PROGRESS.

# Somalia's Premier Manufacturing, Industrial & Processing Expo 2026

**Build • Process • Progress**

**22 – 23 SEP, 2026**

**TBC**



Organized by
**Ministry of Commerce and Industries**
**Federal Republic of Somalia**

Co-Organized by
Somali Industries Association

Facilitated by
**Arkaan Leadership & Innovation Hub**



# SOMIPEX 2026 IYO MADASHA MADE IN SOMALIA

18 Agoosto 2026, Wasaaraddu waxay si rasmi ah ugu dhawaaqday qabsoomidda Bandhigga Warshadaha Soomaaliyeed (SOMIPEX 2026), oo la qaban doono 22–23 Sebtembar 2026, si loo soo bandhigo wax-soo-saarka gudaha, hal-abuurka, tiknoolajiyadda casriga ah iyo fursadaha maalgashi ee qaybta wax-soo-saarka dalka.

| FAAHFAAHIN | XOGTA |
|---|---|
| Hal-ku-dhigga | "Dib-u-Habaynta Warshadaha Soomaaliya: Hal-abuur, Wax-soo-saar iyo Koboc Dhaqaale" |
| Taariikhda | 22–23 Sebtembar 2026 |
| Daah-fur gaar ah | Madasha Made in Somalia — goob lagu muujiyo tayada, hal-abuurka iyo awoodda wax-<br>soo-saarka Soomaaliyeed |
| Ka-qaybgalayaasha | Warshadleyda, ganacsatada, maalgashadayaasha, hal-abuurayaasha iyo daneeyayaasha<br>horumarinta warshadaha |
| Bahwadaagta | Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha Soomaaliyeed; Ururka Warshadleyda Soomaaliyeed;<br>Arkaan Leadership and Innovation Hub |

## Aagagga Warshadaha, Maalgashiga iyo Xiriirka Qaybta Gaarka

Hindisaha Aagagga Warshadaha (Industrial Zones) ayaa ah mashruuca ugu muhiimsan ee siyaasadeed ee Waaxdu ku hawlan tahay. Muddada la eegayo, wuxuu noqday mawduuca ugu badan ee lagu soo qaado kulamada hoggaanka sare iyo kuwa caalamiga ah.



Wasiirka Ganacsiga iyo Warshadaha, oo ay wehlinayaan Wasiiru-Dowlaha, Wasiir ku-xigeenka iyo Agaasimaha Guud, oo kulan laqaadanaya hoggaamiyeyaasha iyo wakiillada qaybaha warshadaha dalka — Muqdisho, 4 Febraayo 2026.

ISHA: WARFAAFINTA RASMIGA AH EE WASAARADDA

| TAARIIKHDA | DHACDADA | MUHIIMADDA WAAXDA |
|---|---|---|
| 4 Feb 2026 | Wasiirka iyo hoggaanka sare oo la kulmay hoggaamiyeyaasha qaybaha warshadaha | Caqabadaha warshadaha, qorshaha aasaaska aagagga<br>warshadaha iyo kaabayaasha wax-soo-saarka |
| 14 Abriil 2026 | Wasiirka oo la kulmay wakiillo ka socday warshadaha dalka, la socda SOBS | Siyaasado dhiirrigeliya kobaca warshadaha, hirgelinta<br>aagagga, iyo barnaamijyada dhisidda awoodda |
| 6 Juun 2026 | Wasiirka<br>Warshadaha iyo Teknolojiyadda ee Turkiga | Wasiirka oo la kulmay<br>Ka faa'iidaysiga khibradda Turkiga ee aagagga warshadaha<br>iyo horumarinta wax-soo-saarka |
| 15 Luuliyo 2026 | Daah-furka Warbixinta Mudnaanta Leh ee Maalgashiga ee warshadaha wax-soo-saarka | Falanqayn istaraatiiji ah oo lagu soo jiidanayo maalgashiga<br>qaybta wax-soo-saarka |
| 24 Sebtembar 2025 | Kormeerka Warshadda Biraha ee Banaadir | Qiimaynta awoodda wax-soo-saarka iyo beddelka waxyaabaha la soo dhoofiyo |

## Iskaashiga Caalamiga ah iyo Barnaamijyada Taageerada

Waaxdu waxay muddada la eegayo ka faa'iidaysatay shabakad bahwadaag ah oo ballaaran, oo ay ka mid yihiin UNIDO, Midowga Yurub, WTO/EIF, Bangiga Teknolojiyadda ee QM, iyo dowladaha Turkiga iyo Talyaaniga.

- **EU iyo UNIDO — 16 Luuliyo 2026 —**
Madasha Hal-abuurka Ganacsiga oo uu soo xiray Agaasimaha Guud, iyadoo ka qayb galeen masuuliyiin sare oo ka socday Midowga Yurub (EU) iyo Ururka Horumarinta Warshadaha ee Qaramada Midoobay (UNIDO).

- **WTO / EIF — 12 Agoosto 2026 —**
ansixinta Qorshaha Qaran ee 5-ta Sano (2026–2030) ee silsiladaha qiimaha sisinta iyo kalluunka, oo taageero ka helaya Enhanced Integrated Framework (EIF) iyo ESAMI-TRAPCA. Qorshuhu wuxuu hiigsanayaa 300 ganacsi oo la taageero, 80 ganacsi oo lagu xiro iibsadayaal cusub, ku dhowaad 1,200 shaqo, iyo ugu yaraan USD 35 milyan oo maalgashi cusub ah.

- **Bangiga Teknolojiyadda ee QM — 7 Juun 2026 —**
kulan lagu eegayay sida tiknoolajiyadda iyo hal-abuurka loogu adeegsan lahaa taageerada ganacsiyada yaryar, iskaashatooyinka, iyo warshadaha ku salaysan wax-soo-saarka beeraha.

- **Talyaaniga — 14 Juun 2026 —**
Toddobaadka Ganacsiga Soomaaliya iyo Talyaaniga oo Muqdisho lagu qabtay, iyadoo ka qayb galay ku dhowaad 20 maamule iyo wakiillo ka socday shirkado Talyaani ah.

- **Zero Waste Forum, Turkiga — 7 Juun 2026 —**
Wasiirku wuxuu Istanbul kaga hadlay dib-u-dhiska kaabayaasha warshadaha ku salaysan wax-soo-saarka beeraha, kordhinta qiimaha, iyo ballaarinta dhoofinta.

- **GEED — 21 Maajo 2025 —**
Daah-furka rasmiga ah ee barnaamijka GEED iyo shirkii ugu horreeyay ee Guddiga Hagaajinta, oo ay taageerayaan Midowga Yurub iyo Iskaashiga Dowladda Jarmalka.



## Magacaabista Hoggaanka Waaxda

26 Agoosto 2026, Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha, Danjire Jamaal Maxamed Xasan, ayaa sameeyay isku-shaandhayn Agaasime Waaxeedyada Wasaaradda si loo dardargeliyo hawlaha shaqo iyo dib-u-habaynta adeegyada ganacsi ee Wasaaraddu bixiso. Mudane Cabdirisaaq Xasan Yusuf ayaa loo magacaabay Waaxda Horumarinta Warshadaha. Agaasimayaasha ayaa la faray inay si rasmi ah ula kala wareegaan xilalka, masuuliyadaha, dukumentiyada iyo agabka la xiriira waaxyaha loo kala wareejiyay.

# Caqabadaha, Talooyinka iyo Mudnaanta 2026 - 2027

Waxa xannibaya in kororka tirada warshaduhu u beddelmo wax-soo-saar tartan leh, iyo tallaabooyinka lagu talinayo.

## Caqabaha la Aqoonsaday

| CAQABADDA | ASTAANTA AY KU MUUQATO | SAAMAYNTA |
|---|---|---|
| Qiimaha tamarta | Wasiir ku-xigeenku wuxuu 21 Maajo 2025 sheegay in hoos u dhac ku yimid horumarinta warshadaha iyo wax-soo-saarkooda sababo la xiriira tamarta oo aad qaali u ah | Kharashka wax-soo-saarka ayaa kor u kaca, tartankuna hoos ayuu dhacaa |
| Aagag warshadeed oo aan weli hirgelin | Hindisaha aagagga warshadaha wuxuu weli ku jiraa heerka qorshaynta iyo wadahadalka labaanka ah | Warshaduhu waxay ku kala firirsan yihiin goobo aan lahayn kaabayaal wadaag ah |
| Tayada iyo baakadaynta | Kaydin aan ku filnayn, tayo aan joogto ahayn, baakadayn aan gaarsiisneyn heerka suuq-geynta, iyo kaabayaal qaboojin oo kooban | Badeecadaha waxay lumiyaan qayb ka mid ah qiimahooda suuqa |
| Shahaadaynta oo aan weli caam ahayn | Kulanka SOBS ee 10 Maajo 2026 wuxuu muujiyay in warshadleyda badankood aysan weli buuxin habraacyada shahaado-bixinta | Badeecadaha ma gaari karaan suuqyada caalamiga ah ee shahaado weydiista |
| Qaab-dhismeed sharci oo aan dhamaystirnayn | Sharciga Hanti-Maskaxeedka wuxuu weli yahay qabyo-qoraal sugaya ansixinta heer siyaasadeed | SIPO waxay ku shaqaynaysaa awood ku-meel-gaar ah |

# Talooyinka

- **Hirgelinta Sharciga Asalka —**
Diyaarinta xeer-hoosaadyada hirgelinta iyo dejinta nidaamka bixinta Shahaadada Asalka Badeecadaha, iyadoo la caddaynayo doorka Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha Soomaaliyeed. Ansixinta sharcigu waa bilow, ma aha dhammaad.

- **Dhamaystirka sharciga IP —**
Gudbinta Qabyo-qoraalka Siyaasadda iyo Sharciga Hanti-Maskaxeedka Golaha Wasiirrada isla rubuca afraad ee 2026, iyadoo la diyaariyo xeer-hoosaadyada hirgelinta si sharcigu marka la ansixiyo uu isla markiiba shaqeeyo.

- **Aagagga warshadaha —**
Ka gudubka wadahadalka una gudubka qorshe farsamo oo cad: goobaha, tamarta, biyaha, wadooyinka iyo maamulka. Khibradda Turkiga ee laga wada hadlay 6 Juun 2026 ha loo beddelo heshiis farsamo oo la taaban karo.

- **Shahaadaynta tayada —**
Barnaamij wadajir ah oo Waaxda iyo SOBS ay ku dardargeliyaan shahaado-bixinta badeecadaha gudaha, iyadoo mudnaanta la siinayo warshadaha dhoofinta ku wajahan.

- **Made in Somalia —**
Isticmaalka SOMIPEX 2026 iyo Madasha Made in Somalia si loogu xiro diiwaanka 268-ka warshadood nidaam sumadayn iyo tayo-hubin, ee aan lagu koobin bandhig hal mar ah.

- **Xogta warshadaha —**
Ballaarinta xogta diiwaanka: waxa hadda la haysto waa tirada warshadaha. Waxa la baahan yahay in lagu daro nooca wax-soo-saarka, awoodda wax-soo-saarka, tirada shaqaalaha iyo goobta— si loo taageero siyaasadda maalgashiga.

- **Silsiladaha qiimaha —**
Hirgelinta Qorshaha 5-ta Sano ee sisinta iyo kalluunka (2026–2030) iyadoo Waaxdu ka qaadanayso doorka farsamaynta iyo qiimo-ku-darka.

# Mudnaanta 2026-2027

| MUDNAANTA | XILLIGA LA HIIGSANAYO | CABBIRKA GUUSHA |
|---|---|---|
| Xeer-hoosaadyada Sharciga Asalka Badeecadaha iyo bilaabista bixinta Shahaadada | Rubuca 4-aad 2026 | Shahaado kowaad oo qaran ah oo labixiyay |
| Ansixinta Sharciga iyo Siyaasadda Hanti-Maskaxeedka | Rubuca 4-aad 2026 | Sharciga oo Golaha Wasiirrada u gudbay |
| Qabsoomidda SOMIPEX 2026 iyo daah-furka Made in Somalia | 22–23 Sebtembar 2026 | Bandhigga oo dhacay; madasha oo shaqaynaysa |

## Mudnaanta 2026-2027

| | | |
|---|---|---|
| Qorshe farsamo oo aagagga warshadaha ah | Rubuca 1-aad 2027 | Goob la go'aamiyay iyo qorshe kaabayaal |
| Dhamaystirka diiwaanka warshadaha ee faahfaahsan | Rubuca 2-aad 2027 | Xog dhamaystiran oo 268+ warshadood |
| Daabacaadda joogtada ah ee Wargeyska Hanti-Maskaxeedka | Laba biloodba mar | Nuqul kasta oo waqtigiisa soo baxa |

# LIFAAQA DIIWAANGELINTA WAXQABADKA 2025-2026

Dhacdooyinka rasmiga ah ee toos ugu xiran Waaxda Horumarinta Warshadaha ama howlaha warshadaynta, sida ay uga muuqdaan diiwaanka warfaafinta Wasaaradda.

| | | |
|---|---|---|
| 29 Agoosto 2026 | Waaxdu waxay furtay kulanka ansixinta Siyaasadda iyo Sharciga Hanti- Maskaxeedka (29–31 Agoosto) | Waaxda |
| 27 Agoosto 2026 | Magacaabista Agaasimaha Waaxda Horumarinta Warshada | Wasiirka |
| 18 Agoosto 2026 | Ku dhawaaqista SOMIPEX 2026 iyo Madasha Made in Somalia | Wasaaradda |
| 13 Agoosto 2026 | Shaacinta sumadaha la diiwaangeliyay iyo sharraxaadda Nice Classification | Waaxda |
| 12 Agoosto 2026 | Ansixinta Qorshaha Qaran ee 5-ta Sano ee sisinta iyo kalluunka (2026–2030) | Agaasimaha Guud |
| 6 Agoosto 2026 | GOLAHA WASIIRRADA OO ANSIXIYAY SHARCIGA CADDEYNTA ASALKA BADEECADAHA | Golaha Wasiirrada |
| 4 Agoosto 2026 | Daabacaadda Wargeyska Hanti Maskaxeedka Warshadaha (Lr. 24/2026) | Waaxda |
| 18 Agoosto 2026 | Ku dhawaaqista SOMIPEX 2026 iyo Madasha Made in Somalia | Wasaaradda |
| 2 Agoosto 2026 | Shirka Dardargelinta Istiraatiijiyadda NTFC — fududaynta ganacsiga | Ra'iisul Wasaare Ku-xigeen |

| TAARIIKHDA | DHACDADA | HOGGAAMINTA |
|---|---|---|
| 16 Luuliyo 2026 | Xiritaanka Madasha Hal-abuurka Ganacsiga (EU iyo UNIDO) | Agaasimaha Guud |
| 15 Luuliyo 2026 | Daah-furka Warbixinta Mudnaanta Leh ee Maalgashiga ee warshadaha | Agaasimaha Guud |
| 15 Luuliyo 2026 | Wareysiga Nation Africa — fursadaha dhaqaale ee Soomaaliya | Wasiirka |
| 11 Luuliyo 2026 | Dhagax-dhigista dib-u-dhiska xarunta Wasaaradda | Ra'iisul Wasaaraha |
| 15 Juun 2026 | Kulan wadatashi oo ku saabsan qabyo-qoraalka Siyaasadda iyo Sharciga Hanti-Maskaxeedka | Waaxda |
| 14 Juun 2026 | Toddobaadka Ganacsiga Soomaaliya iyo Talyaaniga, Muqdisho | Wasaaradda |
| 7 Juun 2026 | Khudbadda Zero Waste Forum, Istanbul | Wasiirka |
| 7 Juun 2026 | Kulan lala yeeshay Bangiga Teknolojiyadda ee QM | Wasiirka |
| 6 Juun 2026 | Kulan lala yeeshay Wasiirka Warshadaha iyo Teknolojiyadda ee Turkiga — aagagga warshadaha | Wasiirka |
| 10 Maajo 2026 | KULANKA WARSHADLEYDA IYO HAY'ADDA TAYO-DHAWRKA (SOBS) — SHAHAADO-BIXINTA IYO ASTAAMAHA TAYADA | Waaxda / SOBS |
| 7 Maajo 2026 | Kulan lala yeeshay Danjiraha Qatar — ganacsi, maalgashi iyo warshado | Wasiirka |
| 14 Abriil 2026 | Kulan lala yeeshay wakiillada warshadaha dalka, la socda SOBS | Wasiirka |
| 4 Febraayo 2026 | Kulan lala yeeshay hoggaamiyeyaasha warshadaha — aagagga iyo caqabadaha | Wasiirka |
| 22 Janaayo 2026 | Booqashooyin kormeer ah oo lagu tagay warshadaha Muqdisho Agaasimaha | Waaxda |
| 21 Janaayo 2026 | Kulan lala yeeshay ganacsatada Gobolka Banaadir | Wasiirka |
| 4 Nofembar 2025 | Kulamada is-waafajinta heer federaal iyo dowlad-goboleed, Nairobi | Wasiirka |
| 27 Oktoobar 2025 | Kulan lala yeeshay Danjiraha Turkiga — iskaashi warshadeed | Wasiirka |
| 24 Sebtembar 2025 | Kormeerka Warshadda Biraha ee Banaadir | Wasiirka |

| TAARIIKHDA | DHACDADA | HOGGAAMINTA |
|---|---|---|
| 16 Sebtembar 2025 | Kulan lala yeeshay wafdi heer sare ah oo ka socda ARSO | Wasiirka |
| 6 Sebtembar 2025 | Wadahadalka Wasiirrada ee AfCFTA, IATF 2025, Aljeeriya | Wasiirka |
| 3 Juun 2025 | Daah-furka tababarka Sharciga Asalka Badeecadaha (Rules of Origin) | Agaasimaha Waaxda |
| 21 Maajo 2025 | Daah-furka barnaamijka GEED iyo Guddiga Hagaajinta | Wasiir ku-xigeenka |

# MADE IN SOMALIA

**Madasha Aqoonsiga Wax-soo-saarka Soomaaliyeed.** Made in Somalia waxaa si rasmi ah loo daah-furayaa inta lagu guda jiro SOMIPEX 2026, iyadoo madashu diiradda saarayso tayada, hal-abuurka iyo awoodda wax-soo-saarka Soomaaliyeed.

## Maxay Madashu Tahay?

Madasha Made in Somalia waxay ka gudbinaysaa diiwaangelinta warshadaha heer maamul, iyadoo diiwaanka 268-ka warshadood loo adeegsanayo saldhig aqoonsi, sumadayn iyo suuq-geyn qaran.

## Saddex Tiir oo Muhiim ah

| Aqoonsi | Tayo | Suuq |
|---|---|---|
| In wax-soo-saarka Soomaaliyeed yeesho aqoonsi qaran oo la isku halayn karo. | In sumadda Made in Somalia lagu xiro nidaamyo tayada iyo shahaadaynta badeecadaha. | In badeecadaha Soomaaliyeed loo diyaariyo fursado suuq oo ka baxsan gudaha dalka, gaar ahaan EAC iyo AfCFTA. |

## Laga bilaabo Diiwaan → Sumad Qaran

268+ Warshadood → Aqoonsi & Sumadayn → Tayo & Shahaado → Suuqyo Gudaha & Dibadda

### TALLAABADA XIGTA

Madasha Made in Somalia waa in aan lagu koobin bandhig hal mar ah. Waxaa loo qorsheeyay in lagu xiro diiwaanka warshadaha nidaam joogto ah oo sumadayn iyo tayo-hubin ah.

**“Mudnaanteennu maaha inaan tiro kordhinno, ee waa inaan tayo dhisno.”**

# SOMIPEX 2026

**Bandhigga Warshadaha Soomaaliyeed**
**Dib-u-Habaynta Warshadaha Soomaaliya: Hal-abuur,**
**Wax-soo-saar iyo Koboc Dhaqaale 22–23 Sebtembar 2026**

SOMIPEX 2026 waa Bandhigga Warshadaha Soomaaliyeed oo loogu talagalay in lagu soo bandhigo awoodda wax-soo-saarka gudaha, hal-abuurka, tiknoolajiyadda casriga ah iyo fursadaha maalgashi ee qaybta warshadaha dalka.

## Ujeedada Bandhigga

- Soo bandhigidda wax-soo-saarka gudaha
- Muujinta awoodda iyo tayada warshadaha Soomaaliyeed
- Isku-xirka warshadleyda, ganacsatada iyo maalgashadayaasha
- Abuuridda fursado cusub oo iskaashi iyo maalgashi
- Kor u qaadidda aqoonsiga wax-soo-saarka Soomaaliyeed

## Ka-qaybgalayaasha

Warshadleyda · Ganacsatada · Maalgashada-yaasha · Hal-abuurayaasha · Daneeyayaasha Horumarinta Warshadaha

## Bahwadaagta

Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha Soomaaliyeed
Ururka Warshadleyda Soomaaliyeed
Arkaan Leadership and Innovation Hub

**SOMIPEX 2026 wuxuu noqonayaa madal lagu muujiyo awoodda warshadaha Soomaaliya, laguna xiro wax-soo-saarka gudaha fursadaha suuqa iyo maalgashiga.**

Xogta dhacdada sida ku xusan warbixinta: 18 Agoosto 2026 ayaa si rasmi ah loogu dhawaaqay qabsoomidda SOMIPEX 2026, oo la qorsheeyay 22–23 Sebtembar 2026.

— Dhamaad —

Muqdisho, Agoosto 2026
Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha
Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

**Abdulkadir Said Mohamoud**
AGAASIMAHA WAAXDA HORUMARINTA WARSHADAHA · DIIWAAN-HAYAHA GUUD EE HANTIDA MASKAXEED